Tirakoobka 2020
Fiiro Guud

Tirinta qof walba, hal mar, iyo meesha saxda ah.

Xafiiska Tirakoobka Mareykanku waa hay'adda ugu weyn tirakoobka dowladda federaalka. Waxaa naga go'an inaan soo bandhigno xaqiiqooyinka hadda jira iyo tirooyinka ku saabsan dadka Mareykanka, meelaha, iyo dhaqaalaha. Sharciga federaalku wuxuu ilaalinayaa sirta dhammaan jawaabaha shaqsiyadeed ee Xafiiska Tirakoobku aruurinayo.

Dastuurka Mareykanka wuxuu farayaa in tobankii sanaba aan tirinno - ama tirakoobno — tirada dad waynaha Mareykanka.

Tirakoobka wuxuu bixinayaa macluumaad muhiim ah adiga iyo bulshadaada.

- Waxay go'aamineysaa inta wakiil ee gobol kastaa ka helayo Kongress ka iyo in loo isticmaalo dib-u-habeynta xuduudaha degmada.
  Dib-u-habeynta Tirakoobka waxaa loo dirayaa gobolada marka la gaaro Maarso 31, 2021.
- Bulshooyinka ayaa ku tiirsan tirakoobka si ay ugu qorsheeyaan baahiyaha kala duwan dadka deegaanka ah oo ay ku jiraan wadooyinka cusub, iskuulo, iyo adeegyada gurmadka.
- Ganacsiyadu waxay adeegsadaan xogta tirakoobka si ay u go'aamiyaan meelaha laga furayo goobo laga dukaamaysto.

Sanad walba, dowladda federaalku waxay u qaybisaa in kabadan $ 675 bilyan gobolada iyo bulshada iyadoo lagu saleynayo xogta Xafiiska Tirakoobka.

Sanadka 2020, waxaan hirgalin doonaa teknolojiyad cusub si aan uga fududeyno sidii ay awal ahaan jirtay in lagu jawaabo. Markii ugu horreysa, waxaad awood u yeelan doontaa inaad ku jawaabto online, taleefan, iyo boostada. Waxaan u adeegsan doonnaa xogta dadweynuhu horay u bixiyeen si loo yareeyo booqashooyinka soo noqnoqnaya.
Iyo, waxaan samaynaynaa liis cinwaan sax ah isla markaana aan isla meel dhigeyno meesha aan ka hawlgalanyno -- dhammaanna anagoo ilaalinayna macluumaadkaaga si qarsoodi ah oo aamin ah.

United States® Census Bureau

TALAABOOYINKA MUHIIMKA AH

2018

- Dhamaadka Tijaabada Tirakoobka-2018
- Su'aalaha Tirakoobka 2020 waxaa loo diray Koongareeska Maarso 31, 2018
- Tirakoobka 2020 6 Xafiisyo oo guud 2020-ka iyo 40 xafiis oo tirakoobka deegaanka oo furan

2019

- Furitaanka hawlaha iskaashiga
- Aasaasida Gudiyada Tirinta oo dhameystiran
- Cusbooneysiinta liiska Tirakoob qaadayaasha qof ahaan
- Waxaa hadhsan furitaanka xafiisyada goobaha tirakoobka 248

2020

- Xayeysiintu waxay bilaabmaysaa koobaad 2020
- Jawaabta dadweynaha (khadka tooska ah, telefoonka, ama boosto) ayaa bilaabmaysa
- Maalinta Tirakoobka – Afaraad 1, 2020
- Tirakoob qaadayaashu waxay booqdaan qoysaska aan jawaabin
- Tirakoob qeybinta loo diray Madaxweynaha bisha Disember 31, 2020

2021

- Dib-u-habeynta Tirakoobka loo diray gobolada March 31, 2021–20

Nagala soo xiriir
@uscensusbureau

Hordhaca Barnaamijyada Xafiiska Tirakoobka

TIRAKOOBYO

- Tirakoobya**da toban** sanadlaha ahi waa tirinta dadka tobankii sano hal mar tirinta guryaha ee dhammaan 50-ka gobol, Degmadda Columbia, Puerto Rico, iyo Island Areas. Natiijooyinka tirakoobka ayaa go'aamiya tirada kuraasta gobol kasta oo ku yaal Mareykanka. Golaha Wakiilada waxaana loo isticmaalaa in laga soo doorto Kongresska iyo golaha sharci dejinta ee degmooyinka. Hay'adaha federaalku waxay u isticmaalaan natiijooyinka inay ugu qaybiyaan wax kabadan $ 675 bilyan oo ka mid ah lacagaha federaalka ah sanad walba.
- Tirakoobka dha**qaal**aha wuxuu cabiraa dhaqaalaha qaranka shantii sanaba mar, isagoo siinaya tirakoob muhiim ah ku dhawaad warshado kasta iyo goobaha juqraafi ahaaneed ee dalka.
- Tirakoob**yada Dowla**daha ayaa soo saara xog dhameystiran oo ku saabsan 90,000 ee goboada iyo dowladaha hoose ee dalka shantii sanaba mar.

XOG URURIN

- Xog Ururinta **Bulsh**ada Mareykanka (ACS) ayaa samaysa xog ururinta joogtada ah ee qaranka --- sambal gaadhaya 3.5 million oo cinwaanno ah sanadkii - oo siisa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan guryeynta qaranka iyo dadka. ACS waa isha kaliya ee la isbarbar dhigi karo, macluumaad tayo leh oo ku saabsan dadka ku nool dhammaan deegaannadayada. Xogtan ayaa muujineysa sida dadka Mareykanka ay u egyihiin iyo sida ay isu beddeleyso. Xogta ACS waxaa loo isticmaalaa in lagu qiimeeyo wixii soo maray iyo hadda iyo sidii loo qorsheyn lahaa mustaqbalka.
- Xog ururinta juq**uraafi ee** cabiraysa daqliga, saboolnimada, waxbarashada, ceymiska caafimaadka, tayada guryeynta, waxyeelada dambiyada, isticmaalka kumbuyuutarka, iyo maadooyin kale oo fara badan.
- Xog ururin**ta** dhaqaalaha waxaa la sameeyaa bil kasta, saddex-biloodle, iyo sanadle. Waxay daboolayaan waaxaha la xushay ee dhaqaalaha qaranka waxayna ku kabaan tirakoobka dhaqaalaha macluumaadka joogtada ah ee la xidhiidha isbedelka dhaqaalaha . Xog ururintani waxay soo saarta in kabadan 400 warbixinno dhaqaale oo sanadle ah, ooy kujiraan tusayaasha dhaqaalaha aasaasiga ah.
- Xog u**rurida l**a kafaalo qaaday (Sponsored surveys) waa xogaha tirakoobyada iyo dhaqaalaha loo fuliyey hay'adaha kale ee dawladda. Waxay ka mid yihiin Xog ururinada Dadweynaha ee Hada, Xog-ururinta Wareysiga Caafimaadka Qaranka, iyo Xog ururinta Qaranka ee Kulliyadaha Qalin-jabinta.

Faahfaahin dheeraad ah, ka hel
census.gov.
Nagala soco @uscensusbureau
Nagala soo xiriir:

Macluumaadkaaga waxaa ilaaliyay sharciga

Sharciga wuxuu farayaa Xafiiska Tirakoobka inuu ilaaliyo macluumaadkaaga qarsoodiga ah isla markaana u isticmaalo jawaabahaaga tirakoobka oo kaliya. Si fagaare ah uma bixin karno jawaabahaaga si kasta oo lagugu aqoonsi karo. Weligeen macluumaadkaaga lama wadaagi doonno hay'adaha fulinta socdaalka sida sida ICE, wakaaladaha fulinta sharciga sida FBI ama booliska, ama uma ogolaan doono in loo isticmaalo in lagu go'aamiyo u-qalmitaankaaga gargaarka dawladda.

Himiladayada Dhow

In aan noqono hormuudka adeeg bixiyaha qaranka ee soo saarida xog tayo leh oo ku saabsan dadkeeda iyo dhaqaalaheeda.

Yoolkayaga Fog

In aan noqono isha lagu kalsoonaan karo ee waqtiga ku habboon iyo macluumaadka la xiriira tirakoobka, iyo hormuudka macluumaadka Xogta la xidhiidha.

Taariikhda Tirakoobyada

Thomas Jefferson wuxuu hogaamiyay tirakoobkii ugu horreeyay ee ahaa 1790. Sida uu u ina farayo Dastuurka Maraykanku, tirokoob ayaa la qabtaa 10-kii sano mar. Sanadkii 1840, Xeerka Tirakoobka ayaa oggolaaday in la sameeyo Xafiiska Tirakoobka oo meel dhexe laga dhigay. Sanadkii 1902, Xafiiska Tirakoobka wuxuu noqday a hay'ad joogto ah oo ka dhex shaqeysa waaxda arrimaha gudaha. Sannad kadib, waxaa dib loo magacaabay Xafiiska Tirakoobka waxaana loo wareejiyay Waaxda cusub ee Ganacsiga iyo Shaqada.